# WARBIXIN KU SAABSAN KADEEDISKA SKUULKA

**oo loogu talogalay waalidka.**

Hagahan waxaa loogu talagalay waalidiinta carruurta luqadaha qalaad ku hadasha, yacni waalidiinta afkooda hooyo uusan aheyn finnish, iswiidhish ama saame.
Haguhu wuxuu ku siinayaa macluumaad ku saabsan dhibista, qashqashaadista iyo takoorista.
Hagahan waxaa lagu sheegayaa, sida suurtagalka ah ee arrimahaas wax looga qaban karo.



etno Etnisten suhteiden neuvottelukunta

Etelä-Suomi

Sida ay baaritaannadu sheegayaan carruurta dadka dalka u soo guuray waxay la kulmaan dhibista dugsiga iyo dagaalka jireed ee ugu badan.
Dhallinyarada dalka u soo guuray waa kuwa inta badan aan saaxiibo laheyn, waxaana si ka badan sida dhallinyarada kale loogu hanjabaa dagaal.
Helitaanka adeegyada ardayda loogu talagalay waa mid iyaga ku adag marka kuwa kale loo eego.
Dhallinyarada dibadda ku dhalatay ayaa ah kuwa loogu dhibista badan yahay.

Isha warka: Wasaaradda caddaaladda, Qashqashaadiddu waa takooris 1/2018 | https://yhdenvertaisuus.fi/policy-briefit

---

**Dhibista dugsiga** waxaa loola jeedaa in si joogto ah arday dugsi loogu dhibo. Dhibistu waxay noqon kartaa tusaale ahaan kala tuurid, gacan-qaadis, aflagaadeyn iyo ku jeesjeesid. Dhibistu waxay xittaa noqon kartaa kooxda oo bannaanka looga saro, hadallada xaasidnimada ah ama wax kasta oo lagu doonayo in la dhibaateeyo ama dhaawaco qof kale.
Dhibistu waxay ka dhigan tahay in qofka la dhibay aan laga qeybgelin waxqabadka fasalka, kooxda ama koox internetka ka dhex sameysan.

Dhibistu inta badan waa dembi.
Tusaale ahaan xadgudub sharafeedka, hanjabaadda iyo jirdilistuba waa dembi, waxay intooda badan la xiriiraan dhibista.
Sida uu sharcigu qabo, guubaabinta iyo caawinta dhiblowgu xittaa waa dembi.

Isha warka: Ururka badbaadada carruurta ee Mannerheim| www.mll.fi

---

**Qashqashaaddu** waa in fal ama hadallo xaasidnimo ah qof kale lagula sameeyo xaalad karaahiyo ah ama xun.
Qashqashaaddu waxay noqon kartaa tusaale ahaan aflagaadeyn, fidinta kutiri-kuteenta ama xadgudubyo kale.
Arrintu waa takoor, haddii ay qashqashaaddu ku saleysan tahay midabka jirka, dhalashada, diinta ama sifo kale oo uu qofku leeyahay.

Isha warka: Merriam-Webster (qeexidda qaamuuska ee ereyga ”harrasment”)

**Takoorid** waxaa loola jeedaa in qofka loola dhaqmo si ka xun sida dadka kale loola dhaqmo sifihiisa gaarka u ah dartood. Sharciga sinnaantu wuxuu qabaa in aan qofna loo takoori karin tusaale ahaan sababo la xiriira:

- da'da
- dhalashada
- diinta
- jihada galmada
- asalka
- luqada
- caqiidada
- ama wax kale oo qofka la xiriira

Isha warka: Wakiilka sinnaanta u dooda | https://www.syrjinta.fi/web/OTHER/other-languages

---

Dugsi kasta waxaa waajib ku ah in uu dejiyo **qorshaha sinnaanta**.
Sida uu qabo sharciga sinnaantu (6 §) dugsigu waa in uu qiimeeyaa waxa la sameynayo si aan qofna dugsiga dhexdiisa loogu dhibin, takoorin ama loogu kadeedin.
Dugsigu waa in uu wax uun sameeyaa, haddii sinnaantu aysan dugsiga ka hirgelin.

Isha warka: Waaxda waxbarashada | www.oph.fi

---

## Sidee ayaad u soo faragelin kartaa dhibista?

Waxaad cunugga u sheegi kartaa waxa uu sameyn karo
"Cunuggaygiyow, haddii aad aragto ama aad la kulanto dhibitaan, waxaad dhiblowga u sheegtaa, in aadan dhibitaanka ogoleyn.  Ha aamusin, ka dhaqaaq ama iska dhig mid aan dhibitaankaba ogeyn. Haddii aysan la hadliddu waxba ka tarin, u sheeg qof kale. U sheeg macallinka, maamulaha dugsiga, saaxiibkaa ama annaga guriga noogu sheeg.
Ka codso waalidkaa, walaaladaa ama saaxiibadaa in ay arrinta sheegaan, haddii aadan adigu sheegi karin ama aadan dooneyn in aad dugsiga ku sheegto.
Macallinka ama shaqaalaha kale ee dugsiga ayaa arrinta u sheegaya maamulaha dugsiga.
Dhibitaanka waxaad sidoo kale ku sheegi kartaa imayl ama farriin aad Wilmada ugu dirto macallinka ama maamulaha dugsiga.
Waa in aad marwalba soo sheegtaa dhibitaanka, takooridda iyo qashqashaadidda, haddii xittaa aan adiga laguu geysan.
Waa muhiim in dhibitaanka la soo sheegaa, sababtoo ah qofka la dhibayo markasta arrinta ma sheegyo."

Isha warka: Dugsiga tababarka macallimiinta| Qorshaha sinnaanta | www.helsinki.fi

## Hababka saameyn ku yeelashada waaalidka loogu talagalay ee ka soo baxay hoosadihi

ETNO ee Galbeedka Finland

Marka hore arrinta baaritaan ku samee. Dhegeyso cunuggaada, laakiin si otomaatig ah u rumeysan cunugga.
Si deggan ula sheekeyso cunugga iyo dugsigaba aragtidaadana sabab u yeel.
Dugsigu wuxuu idiin qabanqaabin karaa madal aad kula hadashaan dhiblowga iyo waalidkiis.
Inta badan wadahadal ayaa xaaladda xal looga gaaraa dhibitaankuna wuu dhammaadaa.
Ku kalsoonow dugsiga.
U sheeg cunuggaada in aad waalid ahaan taageeraysaan.

**Tusaaleyn:** Saaxiibo ayaa cunuggu looga heli karaa kooxda hiwaayadda ee guriga ka baxsan!

Habab dheeraad ah: Isha warka: Ururka badbaadada carruurta ee Mannerheim | www.mll.fi & https://www.verywellfamily.com/ways-to-prevent-school-bullying-460755

### Sidee ayaad u soo faragelin kartaa takooridda?

Wakiilka sinnaanta u dooda ayaad la xiriiri kartaa, haddii arday, macallin ama qof kale oo shaqaalaha ka tirsan uu cunuggaada u dhibay midabka jirkiisa, diintiisa, luqadiisa ama sifihiisa shakshiyeed darteed. www.syrjinta.fi

Dembiyada rabshadda waa in booliska toos loogu wargeliyaa. Haddii cunugga dagaal loo geystay, tusaale ahaan haddii loo gacanqaaday ama la laaday, booliska toos ugu sheeg. www.poliisi.fi

Centre for Economic Development, Transport and the Environment

Monik ry
MEISTÄ ON MONIKSI!

Kuntoutussäätiö

Kymsote

MONIHELI

SELKO